MINNESOTA
OFFICE OF OMBUDSMAN
FOR MENTAL HEALTH AND
DEVELOPMENTAL DISABILITIES

121 7th Place East, Suite 420, Metro Square Building
Saint Paul, Minnesota 55101

Cod: 651-757-1800
Khadka Bilaashka ah: 800-657-3506
Fakis: 651-797-1950
TTY/Cod: Adeega Minnesota Relay Service 711
https://mn.gov/omhdd

"Cod Siinta Kuwa Marar Dhif ah uun La Maqlo"

Maamulka Daawada neerfaha ee Sharciga MN §253B.092

Dhakhtarka daawaynta ee ku daaweynaya ayaa kuu qori kara dawooyinka neerfaha haddii aad awood u leedahay inaad ogolaato oo aad diyaar u tahay inaad daawooyinka qaadato. Waxaa lagugula dhaqmayaa sida sharcigu qabo inaad awood u leedahay inaad samayso go'aano ku saabsan daawooyinka neerfaha. Culayska waxaa la saarayaa dadka kale si in ay caddeeyaan in aadan awoodin. Dhakhtarkaaga caafimaad ayaa kaa saxiixi doona foomka ogolaanshaha ka dib markii uu kugu wargaliyo halista iyo faa'iidooyinka daawada.

Haddii aadan awood u lahayn inaad ogolaato oo aad diyaar u tahay inaad qaadato daawooyinka neerfaha, maxkamada ayaa kuu magacaabi doonta go'aamiye ku beddela si uu u bixiyo ogolaansho isaga oo adiga ku matalaya. Go'aamiye ku beddela waa qof ay u magacawday maxkamadu in uu ogolaado ama diidmo oggolaanshaha in lagu siiyo dawooyinka neerfaha. Haddii aad diyaarisay dardaaranka daryeelka caafimaad, awooda qareenka ee daryeelka caafimaadka ama aad leedahay mas'uul, maxkamada ayaa laga yaabaa inay doorbido wakiilkaaga, wakiilkaaga daryeelka caafimaadka ama mas'uulka marka ay magacaabayso go'aamiye ku beddela. Go'aamiyaha ku beddela ayaa wuxuu ogolaan karaa in lagu siiyo daawada neerfaha haddii aadan diidaynin.

Haddii aadan -lahayn awood hadda aad ku ogolaan karto oo aadan diidaynin, dhakhtarka daawaynta ee ku daawaynaya ayaa sii wadi kara inuu ku siiyo daawada neerfaha ee laguu qoray kahor intii aan lagu dhigin xarunta daawaynta. Xaalada noocaas ah, daawada waa lagu siin karaa illaa 14 maalmood iyadoo la codsanayo go'aamiye beddelaad ama la codsanayo in la helo amar maxkamadeed ama in la beddelo amarka maxkamada ee hadda jira ee loogu rabo daawada. Tusaale ahaan, dhakhtarka daawaynta ayaa wuxuu doonayaa inuu beddelo nooca iyo/ama qiyaasta daawada neerfaha.

Haddii maxkamadu u magacawday go'aamiye beddelaad ah oo aad ama adigu diiddo ogolaanshaha ama go'aamiyaahaaga beddelkaada ahi, wakiilka daryeelka caafimaadka ama wakiilka diido ogolaanshaha, daawooyinka waxaa lagu bixin karaa oo keliya xaalad deg deg ah ama amar maxkamadeed kadib marka la dhagaysto dacwada arrinta.

Xaalada degdega ah waxaa ku dhawaaqi kara dhakhtar caafimaad keliya marka aadan lahayn awood aad ku bixiso ogolaansho warqaba oo aadna diidayso qaadashada daawooyinka neerfaha. Xaalada degdega ah waxaa lagu dhawaaqi karaa oo keliya marka dhakhtarka daawaynta ee daawaynayaa uu go'aansado in daawada neerfuhu ay lagama maarmaan tahay si looga hortago waxyeelo jireed oo degdeg ah oo kugu timaada adiga ama dadka kaleba.

Haddii dhakhtarka caafimaadku ku dhawaaqo xaalad degdeg ah, daawada neerfaha waxaa lagu siin karaa oo keliya ilaa inta ay xaalada degdega ahi jirto, illaa 14 maalmood. Haddii dhaqtarka caafimaadku codsado dhagaysiga dib u eegista daawada 14 kaas maalmood gudahood, dhakhtarka caafimaadka ayaa sii wadi kara daawada ilaa taariikhda dhagaysiga maxkamada haddii xaalada deg dega ahi ay sii jirto.

Go'aaminta Awoodda in aad Qaadan karto Go'aano Warqab ah

Awooda bixinta ogolaansho warqab ahi waa inay ku salaysnaato fahamkaaga xaaladdaada hadda, sababta isbitaalka laguu jiifiyey iyo fahamka cawaaqibka ka iman karta diidmada daawaynta neerfaha. Waxa kale oo ku jira awoodaada inaad fahanto halista, nacfiyada, iyo beddelaadaha kale ee lagugu daaweyn karo. Go'aankaagu waa inuu noqdo mid sababaysan oo aan ku salaysnayn calaamadaha cudurka dhimirka. **Xaqiiqda ah inaad ku raacsanayn dhakhtarka daaweynta nooca daawada ama qiyaasta daawadu kuma filna inay muujiso in aadanlahayn awooda.**

Haddii dhakharka daaweynta ee ku daawaynayaa uu codsado dhagaysiga dib u eegista daawada, oo badanaa loogu yeero "Dhageysiga Jarvis," maxkamadu waxay magacaabi doontaa qareen (badanaa kani wuxuu noqon doonaa qareenkaaga difaaca xukunka daawaynta) iyo baare maxkamadeed. Waxaad xaq u leedahay baadhe labaad oo aad adigu dooratay. Dhagaysiga marka lagu jiro, codsaduhu waa inuu muujiyo in aadan karti lahayn. Adiga oo adeegsanaya qareenka ay kuu magacawday

maxkamadu, waxaad xaq u leedahay inaad ka soo qaybgasho, markhaatiyaal keento, oo aad su'aalo weydiiso markhaatiyada codsadaha.

Dhagaysiga Dib u eegista Caafimaadka "Dhagaysiga Jarvis"

Maxkamadu waxay markaa go'aansan doontaa inaad awood u leedahay inaad bixiso ogolaanshaha daawada, iyo in daawadu tahay fursad macquul ah. Haddii maxkamadu go'aansato in daawo loo baahanyahay si loo daaweeyo cudurkaaga oo ay kugu amarto inaad daawooyin qaadato, amarku ma sii jiri karo wax ka badan muddada xukunkaaga daawaynta. Haddii aad si madani ahaan laguugu xukumay daawaynta oo soconaysa muddo aan la cayimin, amarku wuxuu socon karaa ugu badnaan laba sano.

Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato amarka maxkamada. Haddii aad rabto inaad racfaan qaadato, la xiriir qareenkaaga. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad codsato dhagaysi wakhti dambe si aad dib ugu eegtaan baahi sii socota in loo qabo amarka maxkamadda. Tan waxaa loo yaqaanaa dhagaysi dib u eegista ama dhagaysig 253B.17.

Halbeegyada lagu Ogaanayo in loo Baahanyahay Daawada Neerfaha

Kuwa soo socdaa waa heerarka maxkamada ama go'aamiyahaaga beddelaada ahi ay tahay inuu isticmaalo si uu u qaato go'aanada ku saabsan maamulka dawooyinka neerfaha marka aadan lahayn awooda aad ku bixin karto ogolaansho warqaba.

Haddii aad si cad u sheegtay waxa aad samayn lahayd markii aad awood u lahayd inaad bixiso ogolaansho, rabitaankaaga waa in la raaco. Caddaynta rabitaankaaga waxaa ku jiri kara wixii dukumenti ah ee qoran sida Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka ee hoos lagu sharaxay.

Haddii aysan jirin wax caddayn ah oo muujinaya waxa aad doorbidayso, ama haddii ay jiraan caddaymo iska soo horjeedaa, go'aanka waa in lagu saleeyo waxa qof macquul ahi uu samayn lahaa. Tani waa inay kujirtaa tixgelinta:

1) qoyskaaga, bulshadaada, akhlaaqda, diinta iyo qiyamkaaga bulsho;
2) khataraha caafimaad, faa'iidooyinka iyo beddelka daaweynta neerfayaasha;
3) in daawooyinka neerfaha ay hooray kuugu shaqeeyeen iyo in kale iyo wixii cilladaha daawada ah ee laga yaabo inaad la soo kulantay, iyo;
4) wixii arrimo kale oo muhiima ah.

Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka

Waxaa jira dhowr nooc oo ah dardaarano daryeel caafimaad oo hormarisa ah. Waxaad isticmaali kartaa mid ka mid ah saddexda nooc ee Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka ee hoos imanaya MN Statute §145C, Baaq hoos imanaya MN Statute §253B.03 qayb-hoosaadka 6d ama Dardaaranka Hore ee Daryeelka Caafimaadka Maskaxda. Dukumiintiyadan dhammaantood waxay kuu oggolaanayaan inaad liis garayso waxa aad jeclaan lahayd in dhakhtarkaaga daaweyntu uu sameeyo haddii aad si lama filaan ah u awoodi weydo inaad bixiso oggolaansho warqaba oo ku saabsan daawaynta caafimaadka.

Haddii aad isticmaasho mid ka mid ah dardaaranadan, waxaad u baahan tahay inaad nuqul siiso dhammaan dhakhaatiirta caafimaadka ee ku daawaysa si loo hubiyo in waxyaabaha aad dooratay la raaci doono. Haddii aad leedahay maamulaha kiiska, sidoo kale waa fikrad fiican inaad qofkaas siiso nuqul ka mid ah dardaaranka.

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dardaaranka hore ee daryeelka caafimaadka, waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Sharciga Naafada 1 (800) 292-4150 ama (612) 332-1441.

Macluumaad Dheeraad ah

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan maamulka dawada neerfaha sida ku xusan Xeerka Xukminta Daawaynta, waxaad wici kartaa Xafiiska Sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka 1-800-657-3506 ama 651-757-1800 Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa Xarunta Sharciga Naafonimada lambarada taleefanada kor ku xusan. Haddii aad hadda ku jirto xukun daawayn madani ah, waxaad la xiriiri kartaa qareenka ay kuu magacawday maxkamadu si uu kaaga caawiyo.

Bayaanka ADA: Haddii aad naafonimo leedahay oo aad rabto ogaysiiskan oo qaab kale ah waxaad ka dalban kartaa degmada. Macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, la xiriir Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, 121 7th Place E., Suite 420 Metro Square Bldg, St. Paul, Minnesota 55101, https://mn.gov/omhdd/ Cod: 651-757-1800 ama Khadka Bilaashka ah: 1-800-657-3506.